





Waxbarashada dugsiga



Dugsiyada Australia



Carruurta Australia waxay u baahan yihiin inay dugsiga aadaan inta u dhaxaysa da'da 5 ilaa 17.



Waxay aadi doonaan:

- dugsiga hoose 6 ama 7 sannadood



- dugsiga sare ugu yaraan 4 sannadood



Dugsiga sare waxaa badanaa loo yaqaan dugsi sare halakan Australia.



Badiba carruurta waxay kaloo aadaan malcamadda ilaa 1 sano ka hor intaysan bilaabin dugsiga hoose.



Carruurta waxaa lagu qoraa gareydka ama heer sannadeedka ayadoo ku xiran da'dooda.



Tani way u kala duwan tahay dowlad-goboleedyada ama toritoriyada kala duwan:



Waxaa Australia ka jira 2 nooc oo dugsiyo ah:

- dugsiyada dowladda



- dugsiyada gaarka looleeyahay

Dugsiyada dowladda




Badiba carruurtu waxay aadaan dugsiyada dowladda.

Waxaa kaloo loo yaqaan dugsiyada dowlad-goboleedka.



Uma baahnid inaad bixiso khidmadaha dugsiga haddii uu ilmahaagu dhiganayo dugsiga dowladda.



Waxaad u baahan tahay inaad bixiso waxyaalahan sida:

- buuggagta



- waxyaalaha kale oo carruurtu ku isticmaasho fasalka



- yunifoomka – dharka ay u baahan yihiin inay soo-xirtan



- kaamamka iyo dalxiisyada gaaban – nashaadyada ay carruurtu ku sameeyaan meelo dugsiga ka baxsan




Waxaad la hadli kartaa cid xafiiska dugsiga joogta haddii aad u malaynayso inaad awoodin inaad bixiso waxyaalahan oo dhan.

Dugsiyada gaarka ah



Dugsiyada gaarka ah waxaa badanaa maamula:



- kooxo diimeed – Kaatoolik, Anglican, Lutheran, Protestan, Jewish ama Muslim



- kooxo madaxbannaan



Khidmadaha dugsiyada gaarka ah waxay noqon karaan kuwo sarreeya.

Dugsi ku-qoridda



Waxaad caawimaad ka heli kartaa in carruurtaada lagu qoro dugsi:

- Qofka-shaqaalaha ah



- qofkii ku-isboonsarey



Waxaad u baahan doontaa inaad tusto:

- dokumantiyada socdaalkaaga



- diiwaanada tallaalka ilmahaaga – daaweyntii ay ka heleen dhatarka ama kalkaaliyaha si looga joojiyo inay xanuunsadaan



- warbixinada ama shahaadooyinka kuwaas oo muujinaya wixii dugsi-dhigasho ama waxbarasho oo uu ilmahaagu hore u lahaa


Dhigashada dugsiga



Sannad-dugsiyeedku wuxuu bilowdaa dhammaadka Janaayo wuxuuna dhammaadaa Diseembar.

4


Badiba dugsiyadu waxay leeyihiin 4 teeram.



Waxaaa jira fasaxyo dugsiyeed u dhaxeeya teeramyada dugsiga.



Dugsiyadu way xiran yihiin fasaxyada dadweynaha.



6 saacadood

Badiba carruurta waxay dhigtaan dugsiga ilaa 6 saacadood maalintii laga bilaabo Isniinta ilaa Jumcaha.



Carruurta waa inay dhigtaan dugsi. Sidaas waa sharci.



Haddii uusan ilmahaagu iman dugsiga, waxaad u baahan tahay inaad dugsiga usheegto sababta.



Dugsigu wuxuu kaa filayaa inaad qoraal usoo qorto aad ugu sheegayso sababta uu ilmahaagu u maqnaa.

Carruurta dhigata dugsiyada Australia



Carruurta kasoo kala-jeeda asalada kala duwan si wadajir bay isku-dhexgalaan dugsiga.



Fasalka dhexdiisa waxaa ku jira:

- ummadda kala duwan
- diimo kala duwan
- heerar bulsho oo kala duwan



Badiba dugsiyadu waxay si wadajir ah wiilasha iyo gabdhaha isla dhigtaan isla fasal.



Waxaa jira dugsiyada qaarkood kuwaas:

- wiilal keliya ah



- gabdho keliya ah

Carruurta u baahan caawimaad dheeraad ah



Haddii ilmahaagu u baahan yahay caawimaad dheeraad ah si uu u barto ingiriisiga waxay dhigan karaan fasallada Ingiriiska luqad siyaada ah ahaan (English as an Additional Language - EAL).



Fasallada EAL badanaa waxaa lagu dhigaa dugsiga ilmahaaga.




Carruurta ay hayso baahiyo gaar ah waxay la xuquuq yihiin sida carruuraha kale.



Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu leeyahay baahiyo gaar ah haddii ay hayso:

- iin jidheed



- iin dhimireed



- dhibaatooyinka maqalka ama ay dhagoole yihiin



- dhibaatooyinka aragga ama indhoole yihiin



- iin waxbarasho



- dhibaato ka hayso siday u dhaqmaan



Carruurta ay hayso baahiyaha gaarka ah badanaa waxaa lagu daraa fasallada dugsiyada caadiga ah.



Waxaa kaloo jira dugsiyo ku takhasusay carruurta qaba baahiyaha gaarka ah.

Sida dugsigu yahay




Marka la joogo dugsiga, carruurta waxaa loo yaqaan arday.



Bareyaasha dugsiyada Australia waxay ku dhiirigeliyaan ardaydooda inay:

- fakaraan



- wax baaraan – inay ka shaqeeyaan sababta waxyaaluhu u dhacaan



Bareyaashu kama filayaan ardayda inay wax u bartaan keliya ayagoo wax soo-xafida.



Ardaydu waxay ka qayb qaataan waxa fasalka ka dhacaya iyagoo:


- su'aalo weydiya



- ka-hadla waxyaalaha



- isku daya howlaha waxbarasho iyo nashaadyo kala duwan



Ardaydu way ka qaybqaataan xataa haddii aysan ku hadlin Ingiriisi badan.



Ardayda waxaa lagu dhiirigeliyaa inay ka qaybqaataan nashaadyada dugsiga oo noocyo kala duwan ah.

- luqadda – aqriska iyo qoraalka



- xisaabta – ka shaqaynta lambarada



- cayaaraha



- muusikada



- dibad-baxa iyo kaamyada – socdaalada ka baxsan dugsiga si loo siiyo ardayda waayo-aragnimooyinka waxbarasho



Dhammaan dugsiyadu waxay bixiyaan
Manhajka Australia.

www.australiancurriculum.edu.au

Waalidiinta iyo dugsiga ilmahooda



Dugsiyadu waxay doonayaan in waalidiintu qayb ka noqdaan waxbarashada ilmahooda.



Waxaad:

- tegi kartaa kulamada oo aad la hadli kartaa baraha ilmahaaga



- hubisaa in ilmahaagu ka soo-shaqeeyo dhammaan shaqada dugsiga iyo shaqo-guriga



- tegi kartaa munsabadaha sida
 - riwaayadaha iyo dheelaha
 - maalmaha cayaaraha



Dhib maaha inaad kala hadasho maamulaha dugsiga wax ku saabsan:

- ilmahaaga iyo waxbarashadooda
- sida xaallada dugsigu tahay



Maamuluhu waa hoggaamiyaha dugsiga.



Waxaad ka helaysaa macluumaad dheeraad ah website-ka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (Department of Education and Training).

www.education.gov.au

Xannaanada Ilmaha iyo waxbarashada hore




Daryeelka ilmaha iyo waxbarashada hore waxay siisaa carruurta yaryar fursadda inay:

- wax ku bartaan oo ku koraan goob ammaan ah
- kula cayaaraan oo kula hadlaan carruuraha kale





- gartaan niyadooda, dareenadooda iyo shucuurtooda iyo sidoo kale dadka kale



Waxay kaloo siisaa waalidiinta kuwaas oo haysta shaqo fursadda inay aadi karaan shaqada.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada chilcare-ka iyo waxbarashada hore website-ka MyChild.

www.mychild.gov.au



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka
ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee
Adeegyada Bulshada

